


Sida aad nagu heli kartid:

Eastville Medical Practice
 East Trees Health Centre
 100a Fishponds Road
 Eastville
 Bristol
 BS5 6SA

Telefoon: 07813 016 911
 email: bristolrose.clinic@nhs.net



Basaska:

Wadada Fishponds — 13, 24, 48, 49 and 506.

<http://goo.gl/OKBKwd>

Si aad u heshid nuqul dheeri ah oo ku saabsan warqaddaan xogta ama oo luqad kala ku qoran ama qaab kala ah, fadlan kala xiriir Kooxda Bristol Clinical Commissioning:
 0117 900 2252.

April 2016

Bristol Community Rose Clinic Isbitaalka Rose ee Bulshada



Isbitaalka Rose ee Bulshada

Isbitaalka Rose ee Bulshada Bristol wuxuu bixinayaa daryeel iyo taageera la siiya dumarka ay dhibaataada ka soo gaarta gudniinta fircooniga ee (FGM).

Isbitaalka wuxuu bixinayaa bay'a oo dumarka loogu yeero inay ka hadlaan baahiyahooda caafimaad qaab xasaasi ah iyo bay'a aan leheyn go'aan horay loo gaaray.

adeeggaan gaarka ah waxaa bixiya shaqaala koox dumar kali ah, oo fahansan xasaasinimada iyo adeega umuuraha la xiriira Gudniinka Fircooniga ee Gabdhaha.

Turjumid waxaa lagu heli karaa haddii la codsada waana mid kuu gaar ah oo dhowrsan.

MSF

Gudniinka Gabdhaha ee Fircooniga (FGM), oo sidoo kale loo yaqaano gudniinka dumarka ama goynta xubinta taranka ee dumarka, wuxuu ku faahfaahisaa Hay'adda Caalamiga ee Caafimaadka (WHO) sida tan:

"dhammaan howlaha la xiriira jaridda qeyb ama dhammaan xubinta taranka ah ee dumarka ama dhaawac soo gaara xumnaha taranka sababa aan wax daaweyn ah la xiriirin".

Xaaladaha caafimaad uu sababa gudniinka waxaa ka mid ah dhibaata la xiriirta kaadida, galmada iyo khatar saaid ah oo la xiriirta cudurada ku dhaca qeybaha xumnaha taranka.

Siideen kuu Caawin Karnaa?

Iyadoo saaridda qeybaha xubinta taranka ee dumarka dib loo hagaajin kara, dumarka qaba 'tolidda' gudniinka fircooniga, waa suurtagal in lagu sameeyo qaliin 'furitaan' ah tani waxey keeni karta inuu dhammaado xanuunka xaaladaha caafimaad oo uu sababo Gudniinka Gabdhaha ee Fircooniga.

Waxaan adeegyadaan siinaa dhamaan dumarka uu saameeyay Gudniinka Fircooniga, haddii ay u baahan yihiin in xubinta loo furo ka hor guurka ama sababa caafimaadka la xiriira dartood. Waxaan ku bixin karnaa qaliinka 'furitaanka' xubinta xarunta Eastville Medical Practice oo ku taala Isbitaalka Bulshada Bristol ee Rose. Balantaada hore, waxaan ka wada hadleynaa baahidaada iyo dooqyada kala duwan ood leedahay.

Bukaanka qaar, waxaan siin karnaa qaliin xiliga dhalhada ah sida qof oo miir qaba, ama waxaan kula talineynaa in qaliinka uu ku sameeyo dhakhtar ku takhasusay qaliinka isbitaalka deegaanka.

Mar walba waxaan ku farax sanahay inaan aragno bukaanka aan hubin in ay rabaan in la daaweeya iyo in kale laakin raba in ay wax dheeri ah oo ku saabsan tartiibta bartraan.

Waxaan adeegyadaan siin karnaa dhammaan dumarka ka weyn 18 sana jir oo ka diiwaan gashan Isbitaalka Bristol GP. Bukaanka uma baahna in loo wareejiyo Dhakhtarkooda Guud waxaana loo qorsheyn karaa inay dhakhtar kula kulmaan isbitaalka iyagoo nagala soo xiriiraaya xiriiradaan hoose.

Wixii macluumaad oo dheeri ah

Fadlan wakhti walbood doonta si toos ah uugala xiriir Xarunta Caafimaadka ee Eastville Medical Practice: 07813016911
E-mail: bristolrose.clinic@nhs.net

Ama la hadal Dhakhtarkaaga Guud wixii ku saabsan wareejin.

Waa kuwaan bogaga qaar oo muhiim kuu ah islamarkaana leh macluumaad dheeri ah:

www.bava.org.uk
www.forwarduk.org.uk/key-issues/fgm